



(MMP)

## MIDOWGA MUSHARAXIINTA PUNTLAND

### war-saxafadeedka midowga musharaxiinta puntland 2019

---

Date: 10/10/2018

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ Warsaxaafadeedkan waxa si wada  
jir ah usoo saaray dhamaan xubnaha ay ka kooban yihiin Midowga Musharixiinta Puntland  
(MMP) oo magacyadooda aad ku arki doontaan qoraalkan qayb kamida.

markay arkeen xaaladaha qalafsan ee uu marayo dalka soomaaliya gaar ahaan dowladda Puntland.

Markay u kuur galeen meesha uu marayo xiriirka Dowladda dhexe iyo maamul gobaleedyada.

markay arkay nabad galyo xumada ka jirta guud ahaan gayiga soomaaliyeed gaar ahaan deegaano katirsan Puntland sida gobolka bari.

Markay uu kuur galayen una muuqatay dib u dhac ka jira dhinaca gudigii xalinta khilafaadka, xulista xubnaha golaha shacabka Puntland.

Markay arkeen suuragalnimada ku takri falka hantida udhaxaysa shacabka Puntland.

Waxay soo saareen warsaxaafadeedkan.

- 1) Midowga Musharaxiinta Puntland (MMP) waxay ugu baaqayaan dhamaan umadda soomaaliyeed shacab iyo xukuumadba inay ilaaliyan midnimada iyo wadajirka.
- 2) (MMP) waxay ugu baaqayaan dhamaan umadda soomaaliyeed gaar ahaan shacabka Puntland in meel looga soo wada jeedsado cadowga soomaaliyeed isla markaana amniga iyo horumarka lagala shaqeeyo dowladda dhexe iyo dowladda Puntland.
- 3) (MMP) Waxay ugu baaqayan dowladda dhexe iyo dowlad gobaleedyada in la isu tanaasulo oo loo turo shacabka soomaaliyeed oo ay mudada dheer ragaadisay dawlad la'aantu.
- 4) (MMP) waxa ay ka digayaan in uu ku yimaado dib udhac ama maroori kayimaada xukuumadda hada jirta magacaabidda guddiga xalinta khilaafaadka xulista xubnaha golaha shacabka Puntland 2019, taasoo keeni karta khilaaf iyo isfaham waa siyaasadeed.
- 5) (MMP) waxay sidoo kale ka digayaan in xukuumadda hada jirta ay ku takri fasho u adeegsiga hantida, agabka iyo Awooda dowladda Puntland olalaheeda tartanka hogaanka sare ee Puntland.
- 6) (MMP) waxay war saxaafadeedkan baaq ugu diriyaan dhamaan isimada iyo wax gardka Puntland iyagoo ku baraarujinaya inay tahay meesha kaliya ee wax laga sixi karaa maanta xulidda Xubnaha golaha shacabka Puntland oo allah uu gacantooda galiyay kalana xisaabtami doono, hadaba (MMP) iyagoo kalsooni buuxda ku qaba Isamadooda iyo waxgaradkoodaba waxay ugu baaqayaan inay maanta shacabkooda ugu hiiliyaan xulidda xubnaha golaha shacabka Puntland inay u xulaan xubno ku haboon masuuliyadaa allahna uga baqayan una turaya shacabka ay matalan.
- 7) (MMP) waxay sidoo kale ugu baaqayaan dhamaan Culumaa'uudiinka, Aqoonyahanka, Ganacsatada, Siyaasiyiinta, Haweenka iyo dhalinyarada in laga wada qayb qaato isbadalka dhabta ah ee shacabka Puntland ubahanyihiin.

- 8) ugu danbayn waxay ugu baaqayaan dhamaan Musharixiinta utaagan xilka hogaanka Puntland 2019 iyo xukuumadda hada jirto inay si wada jir ah uga wada shaqeeyaan sidii ay ku dhici lahayd doorasho xalaal ah oo wakhtigeedii ku dhacda.

Gunaanad.

(MMP) waxa urajaynayaan dhamaan umadd soomiliyeed gaar ahaan shacabka Puntland Amni , istiqraar,iyo horumar.

Alla Mahad leh.



### Xubnaha Midowga Musharixiinta Puntland.

- 1) Abdisamad Mohamed Gallan.
- 2) Mohamed Said Hirsi Morgan.
- 3) Dr Mohamed Salad Ali Qoryoley.
- 4) Mohamed Ahmed Jama shaalle.
- 5) Mohamud Abdi Mohamed Huruse.
- 6) Said Ali Ahmed Qurbawi.
- 7) Abdirizak Abdullahi Jama Janno Gale.
- 8) Haji Mohamed Yasin.

### Guddoomiyaha Midowga Musharixiinta (MMP) Puntland 2019

Abdisamad Mohamed Gallan

Tell: +254742343942 +252907799971